




United Nations Educational, Scientific  
and Cultural Organization



# SAYNIS



## **Hordhac**

Buurqan oo ah saynska fasalka labaad, waxaa soo dilyanlyooy Xarunta Horumarlinta Manbaahilta ee Wasaaradda Waxbaashada lyo Braboorlinta, waxaanuu uu ka mid yahay buurqangta manhaajka cusub ee 1985ka bilaabimay.

Buurqan ijooddada ugu woyin oo looga leeyahay waxa ay tahay In ordiyo da Ingu abuurto xifado ay degaan kooda ku illadani, kuna bandhanu lyo In la sillo aqoon saynsood oo sandhibig u noqon kuita baashada saynsood ee mireegballan.

Xasan Dastuur Obalye  
(Agaanlaalha Waaqda Horumarlinta Manbaahilta)

## **HORDHAC**

Buurqan waxaa soo ururiyay,  
fikreeda soo dubariiday  
duubcaadisa labaad Koxda  
Balkanmada ee Xafiiska UNESCO  
ee qoraalisan tala bixinta  
waxbaashada


Maajo 1994

# **SAYNIS**

**2**

Naqtiin "Noole iyo Ma-noole".

Noole iyo Ma-noole



Xayawaanka iyo dhirtu waa noole.



Aqalka, baabuurka iyo baaskiilku waa  
ma-noole.

Layli:

1. Sheeg magacyada laba noole oo guri-giinna jooga.
2. Sheeg laba ma-noole oo dügsiga laga helo
3. Dhirta iyo dhagaxda kuwee noole ah,  
kuweese ma-noole ah?

1.2

Nooluhu wax ayaa uu cunaa.





wiilasha, faraska iyo geelu waa noole.  
Nooluhu waxa uu u baahan yahay cunto.

Layli:

1. Immisa jeer ayaa aad maalintii wax cuntaa?
2. Cunto la'aan ma noolaan kartaa?
3. Noolaha oo dhammi cunto ma u baahan yahay?

1.3

Ma-nooluhu wax ma cuno.




Baaskiilka, kubbadda, baafka iyo buuggu  
waa ma-noole.

Layli:

1. Ma-nooluhu wax ma cunaa?
2. Ma-nooluhu cunto la'aan ma jiri karaa?
3. Ma-nooluhu cunto ma u baahan yahay?

1.4

Nooluhu waa uu tarmaa



Digaagga iyo gallaydu waa noole.


Nooluhu waa uu tarmaa.

Layli:

1. Noolaha dhammaantii ma tarmaa?
2. Noole aan tarmini ma jiraa?
3. Immisa xayawaan ayaa aad aragtay iyaga oo dhalaya?

1.5

Ma-nooluhu ma tarmo:




Raadiyaha, qalinka, koobka iyo sariirtu waa ma-noole.

Ma-nooluhu ma tarmo sida noolaha.

Layli:

1. Sheeg magacyada 5 ma-noole oo aan boggan ku sawirrayn?
2. Ma-noole tarma ma jiraa?

Nooluhu waa uu koraa.




Lo'da iyo geeduhu waa noole.

Nooluhu waa uu koraa.

Layli

1. Noolaha dhammaantii ma koraa?
2. Hadda iyo sannadkii hore midkee ayaa aad dheer tahay?
3. Nooluhu in uu koray maxaa lagu garan karaa?

Ma-nooluhu ma koro



Shanjada, baabuurka, furaha iyo kildhigu waa ma-noole.

Ma-nooluhu ma koro sida noolaha.

Layli

1. Noolaha iyo ma-noolaha midkee ayaa kora?
2. Ma-nooluhu wax ma dhalaan?
3. Dhagaxda yaryar ma dhagaxda waaweyn ayaa dhalay?

Noc'luhu waa uu dhintaa




Dhirta iyo xayawaanku waa noole.

Nooluhu waa uu dhintaa.

Layli

1. Xayawaan dhintay waligaa ma aragtay?
2. Dhirta marka la jaro ee ay qallasho ma nooshahay mise waa ay dhimatay?
3. Noolaha oo dhammi ma dhintaa?

Ma-nooluhu ma dhinto



Kursiga, baaldiga, dayaaradda iyo mar-kabkuba waa ma-noole.


Ma-nooluhu ma dhinto sida noolaha.

Layli

1. Ma-noole dhintay weligaa ma aragtay?
2. Dhagaxa iyo dadka midkee ayaa dhinta?
3. Ma-nooluhu ma dhintaa sida noolaha?

2.4

Nooluhu waa uu neefsadaa



Wiilka iyo geedku waa noole.


Nooluhu waa uu neefsadaa.

Layli

1. Neefsasho la'aan ma noolaan kartaa?
2. Noole aan neefsanini ma jiraa?
3. Noolaha oo dhammi in uu neefsado ma u baahan yahay?

2.5

Ma-nooluhu ma neefsado




Sabuuradda, saxanka, ashuunta iyo dhaladu waa ma-noole.

Ma-nooluhu ma neefsado sida noolaha.

Layli

1. Neefsasho la'aan ma-nooluhu ma jiri karaa?
2. Ma-noole neefsadaa ma jiraa?
3. Koobabka iyo shimbiraha kuwee ayaa neefsasho u baahan?

Faraqa noolaha iyo ma-noolaha




Nooluhu waa uu tarmaa, dhintaa, koraa,  
neefsadaa waxna waa uu cunaa.

Ma-nooluhu ma tarmo, ma dhinto, ma  
koro, ma neefsado waxna ma cuno.

Layli

1. Sheeg laba waxyaabood oo uu nooluhu kaga duwan yahay ma-noolaha?
2. Sheeg saddex waxyaabood oo aanu ma-nooluhu lahayn?
3. Xoolaha iyo baabuurta midkee ayaa tarma

Xayawaan  
Dhaqdhaqaaqa xayawaanka




Xayawaanku waa noole meel ka tegi kara  
oo meel kale tegi kara.

Xayawaanku siyaabo kala duwan ayaa ay  
u dhaqdhaqaaqaan.

Layli

1. Sheeg siyaabaha kala duwan ee uu xayawaanku u dhaqdhaqaaqo?
2. Sheeg laba xayawaan oo socda?
3. Sheeg Xayawaan dabbaasha?

Xubnaha dhaqdhaqaqa xayawaanka.




Xayawaannadu xubno kala duwan ayaa  
ay ku dhaqdhaqaqaan.

Xubnaha ay ku dhaqdhaqaqaan waa ay  
kala duwan yihiiin.

Layli

1. Xayawaannada aad taqaan sheeg labada ugu lugo badan?
2. Shinnidu immisa lugood ayaa ay leedahay?
3. Diinka iyo duqsiga midkee ayaa lugo badan?

Xayawaanka socda




Xayawaannada socdaa waxa ay samayn karaan dhaqdhaqaqyo kale, sida bootin iyo dabbaal.

Layli

1. Immisa xayawaan oo socda ayaa taqaan? Sheeg magacyadooda?
2. Geela iyo jeerta midkee ayaa dabbaalan kara?
3. Immisa dhaqdhaqaq oo kala duwan ayaa aad samayn kartaa?

Xayawaannada duula.




Xayawaannada duulaa waxa ay samayn karaan dhaqdhaqaqyo kale, sida socod, dabbaal, iyo boodbood.

Layli

1. Sheeg shan xayawaan oo duula?
2. Xayawaannada duulaa dhaqdhaqaaq kale ma samayn karaa? Tusaale ka bixi.
3. Ma taqaan shimbir dabbaalan karta?  
Sheeg magaceeda.

Xayawaannada dabbaasha.




Xayawaannada dabbaasha qaarkood waxa ay samayn karaan dhaqdhaqaqyo kala duwan sida socod, orod iyo boodbood.

Layli

1. Sheeg shan xayawaan oo dabbaasha?
2. Xayawaannadaa immisa ayaa dhaqdhaqaqyo kala kala samayn kara?
3. Ma taqaan xayawaan dabbaasha oo aan dhaqdhaqaq kale samayn karin?  
Sheeg magaciisa.

Xayawaannada boodbooda.




Xayawaannada boodbooda qaarkood dhaqdhaqaqyo kale ayaa ay sameeyaan; qaar waa ay dabbaashaan, kuwa kalena waa ay duulaan.

Layli

1. Sheeg saddex xayawaan oo boodbooda marka ay dhaqdhaqaqayaan,
2. Sheeg laba xayawaan oo boodbooda dhaqdhaqaq kalena sameeyya?
3. Sheeg dhaqdhaqaqyada kale ee ay samayn karaan?

Naqtiiin "Dhaqdhaqaqa Xaya-waanka.



Xayawaannadu dhaç haqaaqyo kala duwan ayaa ay sameeyaan.


Xayawaannada qaar ayaa hal dhaqdhaqaq ka badan samayn kara.

Layli

1. Sheeg saddex siyaabood oo ay xayawaannadu u dhaqdhaqaqaan?
2. Magacow saddex xayawaan oo socda, saddex duula iyo saddex dabbaasha?
3. Magacow xayawaan laba siyaabood oo kala duwan u dhaqdhaqaqi kara?

4.2

Dhalmada xayawaanka.  
Xayawaanka wax u eg dhala.



Xayawaannada qaarkood ilmo u eg ayaa  
ay dhalaari.


Xayawaannadaasi ilmahooda waa ay  
nuujiyaan.

Layli

1. Sheeg afar xayawaan oo ilmo u eg dhala.
2. Xayawaannada ilmaha u eg dhala ma nuujiyaan ilmahooda?
3. Dameeraha iyo shimbiraha kuwee ayaa ilmo u eg dhala?

4.3

Xayawaanka ukunta dhala.




Xayawaannada qaarkood ukun ayaa ay  
dhalaan.

Xayawaannadaasi ilmahooda ma  
nuujiyaan.

Layli

1. Sheeg lix xayawaan oo ukun dhala?
2. Xayawaannada ukunta dhala ma ilma-hooda ma nuujiyaan?
3. Bisadda iyo raha midkee ayaa ukun dhala?

*Naqtiiin "Dhalmada Xayawaanka"*



*Xayawaanku waa noole, waana uu tarmaa (isdhala).*

*Xayawaanka qaarkii waxa uu dhalaa ilmo u eg, kuwana waxa ay dhalaan ukun.*

*Layli*

1. *Xayawaanka ukunta dhala iyo kuwa ilmaha u eg dhala kuwee ayaa ilma-hooda nuujiya?*
2. *Magacow laba xayawaan oo ukun dhala iyo saddex ilmo u eg dhala?*
3. *Waraaba a iyo gaarada midkee ayaa iyo dhala?*

*Cuntada xayawaanka  
Xayawaanka dhirta cuna.*




*Xayawaanku waxa uu u baahan yahay cunto. Xayawaannada qaarkood waxa ay cunaan dhirta.*

*Layli*

1. *Sheeg shan xayawaan oo dhirta keliya cuna?*
2. *Magacow laba xayawaan oo caleenta iyo midhahaba cuna iyo laba midhaha cuna?*
3. *Sheeg magacow yada laba xayawaan oo dabjoog ah iyo laba duurjoog ah oo dhirta cuna?*

Xayawaanka hilibka cuna.




Xayawaannada qaarkood sida libaaxa, waraabaha, dawacada, shabeelka iyo yeedu waxa ay cunaan hilibka.

Layli

1. Sheeg afar xayawaan oo hilibka cuna?
2. Xayawaanadaasi sidee ayaa ay hilibka u helaan?
3. Haramcadka iyo sagaarada midkeeyayaa hilibka cuna?

Xayawaanka dhirta iyo hilibka cuna



Xayawaanka ay ka midka yihii dadka, digaagga iyo jiirku dhirta iyo hilibkaba waa ay cunaan.

Layli

1. Magacow laba xayawaan oo dhirta iyo hilibka cuna.
2. Sheeg laba siyaabood oo dadku cunta-diisa ku helo.
3. Digaagga iyo bakaylaho midkeeyayaa hilibka iyo dhirtaba cuna.

*"Naqtiiin" Cuntada xayawaanka*




Xayawaannadu waxa ay cunaan waxy-aabo kala duwan. Qaarkood waxa ay cunaan dhirta, qaarna waxa ay cunaan hilibka kuwana labadaba waa ay cunaan.

Layli

1. Sheeg afar xayawaan oo dhirta keliya cuna.
2. Sheeg saddex xayawaan oo hilibka keliya cuna.
3. Sheeg saddex xayawaan oo dhirta iyo hilibkaba cuna.

*Faa'iidooyinka xayawaanka  
Cuntada laga helo xayawaanka.*




Xayawaanka waxa aynu ka helnaa cuntooyin kala duwan; sida hilib, caano, subag iyo ukun.

Layli

1. Sheeg lix xayawaan oo aynu hilib ka helno.
2. Sheeg saddex xayawaan oo hilib iyo caano laga helo.
3. Cuntooyinkee ayaa aynu digaagga iyo kalluunka ka helnaa?

*Qalabka laga helo xayawaanka*




*Xayawaanka waxa aynu ka helnaa qalab kala duwan sida kabo, suuman, shandado, sibraarro iyo gambarro.*

*Layli*

1. Magacow saddex ka mid ah qalabka xayawaanka laga helo.
2. Magacow afar xayawaan oo ka mid ah xayawaannada laga helo haragga qalabka laga samaysto.
3. Kalluunka iyo biciidka midkee ayaa laga helaa harag?

*Adeegsiga xayawaanka*




*Xayawaannada waxa loo adeegsadaa siyaabo kala duwan. Qaarkood waa la rartaa, qaarna waa la fuulaa, kuwa beeraha ayaa lagu qotaa, kuwana waa la dhaansadaa.*

*Layli*

1. Magacow saddex xayawaan oo la rarto.
2. Xayawaannada la rarto siyaabo kala ma loo adeegsan karaa?
3. Dibida iyo orgida midkee ayaa beeraha lagu qotaa?

"Naqtiiin" Faa'iidooyinka xayawaan ka



Xayawaanka waxa aynnu ka helnaa faa'iidooyin fara badan; sida cuntooyin kala duwan, rarasho, fuulid iyo in beeraha lagu qoto.

Layli

1. Sheeg saddex faa'iido oo uu xaya-waanku innoo leeyahay.
2. Geela immisa siyaabood oo kala duwan ayaa loo adeegsadaa?
3. Sheeg afar waxyaabood oo aynnu adhiga ka helno.

Waxyeellada xayawaanka  
Xayawaanka dadka waxyeela




Xayawaannada qaarkood waxyello ayaa ay dadka u leeyihii. Qaarkood waa ay qaniinaan, kuwo waa ay cunaan, kuwana cudurro ayaa ay u keenaan.

Layli

1. Magacow laba xayawaan oo dadka cuna.
2. Sheeg saddex xayawaan oo dadka qaniina.
3. Shinnida iyo kaneeecada midkee ayaa dadka cudur u keena?

Xayawaanka dalagga cuna



Xayawaannada qaarkood sida dayeerka,  
doofaarka iyo shimbirihu waxyeello ayaa  
ay u geystaan beeraha.

Layli

1. Magacow saddex xayawaan oo beeraha waxyeela.
2. Dabaggaaluhu beeraha wax ma yeelaa?
3. Qoolleyda iyo tukaha midkee ayaa beeraha cuna?

Xayawaanka dalagga iyo dadka  
waxyeela




Xayawaanka ay ka mid yihin jeerta,  
maroodiga iyo kashiitadu (dhiddadu)  
dadka iyo beeraha dhibaato ayaa ay u  
geystaan.

Layli

1. Magacow laba xayawaan oo dadka iyo beeraha waxyeela.
2. Maroodiga iyo sagaarada midkeeyayaa  
dadka iyo beeraha waxyeela?
3. Wax ka sheeg sida ay kashiitadu (dhiddadu)  
dadka iyo beeraha wax u yeesho.

**Naqtin "Waxyeellada xayawaanka"**




Xayawaannada qaarkood beeraha ayaa  
ay cunaan, qaarna dadka ayaa ay waxy-  
eelaan, kuwana labadaba dhibaato ayaa  
ay u geystaan.

Layli

1. Yaxaaska iyo diirta midkee ayaa dadka  
cuna.
2. Magacow laba shimbirood oo beeraha  
cuna, midkeese dalagga cuna?
3. Libaaxa, daayeerka iyo jeerta midkee  
ayaa dadka iyo beeraha waxyeela?


**Deegaanka xayawaanka**

**Dabjoog**



Xayawaannada dabjoogta ahi waxa ay u  
kala baxaan xoolo sida geela iyo lo'da iyo  
xayawaanno kale sida bisadaha iyo eyda.  
Layli


1. Sheeg afar xayawaan oo dabjoog ah?
2. Dabjoogta oo dhammi ma xoolaa?
3. Bisadaha iyo waxaraha midkee ayaa  
xoolo ah?

**Duurjoog**

*Xayawaannada duurjoogta ahi waxa ay u kala baxaan dugaag sida dawacada iyo waraabaha iyo ugaadh sida gorayada iyo biciidka.*

*Layli*

1. Magacow shan xayawaan oo duurjoog ah.
2. Duurjoogta oo dhammi ma dugaag baa?
3. Haramcadka iyo goodirka midkee ayaa ugaadh ah?

**Naqtiin "Deegaanka xayawaanka"**


*Xayawaannada qaarkood sida xoolaha, eyda iyo bisaduhu waa dabjoog.*

*Xayawaannada qaarna sida ugaadha iyo dugaaggu waa duurjoog.*

*Layli*

1. Magacow saddex xayawaan oo dugaag ah iyo saddex xayawaan oo ugaadh ah.
2. Xayaawaannada ay ka mid yihiin riyaha, digaagga, dawacada, fardaha iyo waraabaha kuwee ayaa dabjoog ah?
3. Saca iyo eyda midkee xcolo ah?

**JIDHKA XAYAWAANKA**  
*Jidhka lo'da*




*Jidhka lo'du waxa uu ka kooban yahay lugo, dhabar, tuur, calool, qoor, madax iyo dabo.*

*Layli*

1. Magacow xubnaha jidhka lo'da.
2. Geesuhu maxaa ay lo'da u taraan?
3. Immisa lugood ayaa ay lo'du leedahay?

***Jidhka shimbiraha***



*Jidhka shimbiruhu waxa uu ka kooban yahay lugo, madax, qoor, baalal, calool, sakaar iyo dabo.*

*Layli*

1. Magacow xubnaha jidhka shimbiraha.
2. Baalalku maxaa ay shimbiraha u leeyihii?
3. Immisa lugood ayaa ay shimbiruhu taraan?

*Jidhka dadka*



*Jidhka dadku waxa uu ka kooban yahay madax, qoor, laab, gacmo, dhabar, calool iyo lugo.*

*Layli*

1. *Magacow afar xubnood oo jidhkaaga ka mid ah.*
2. *Madaxa iyo laabta xubintee ayaa u dhaxaysa?*
3. *Dhabarka iyo laabta mid kee ayaa xagga hore ku yaal?*


*Madaxa*



*Madaxa dadka waxa ku yaal af, san, laba indhood, laba dhegood iyo timo.*

*Layli*

1. *Tiri xubnaha madaxaaga ku yaalla.*
2. *Dadka oo dhammi ma leeyahay xubnahaas?*
3. *Indhaha iyo gacmaha kuwee ayaa madaxa ku yaal?*

*Afka*


*Waxa aan leeyahay af.*

*Afkayga waxa ku yaal debno, ilko iyo carrab.*

*Afka wax ayaa aan ku cunaa waana aan ku hadlaa.*

*Layli*

1. *Halkee ayaa afku jidhka kaga yaallaa?*
2. *Immisa xubnood ayaa afka ku yaal?*
3. *Maxaa uu taraa afku?*

*Sanka*

*Waxa aan leeyahay san.*

*Sanka ayaa aan wax ku uriyaa kana neefsadaa.*

*Sankayga masar ayaa aan ku nadiifiyaa.*

*Layli*


1. *Halkee ayaa sanku jidhka kaga yaal.*
2. *Maxaa uu sanku taraa?*
3. *Gacanta iyo masarka midkee ayaa sanku lagu nadiifiyaa?*

*Indhaha*

*Waxa aan leeyahay laba indhood oo aan wax ku arko.*



*Indha la'aan waxba ma arki karo.*



*Marka ay indhuu i xanuunaan, waxa aan u tagaa takhtarka.*

*Layli*

1. Halkee ayaa ay indhuu jidhka kaga yaalliiin?
2. Indha la'aantu maxaa ay dhibaato. leedahay?
3. Marka ay indhuu ku xanuunaan, halkee ayaa la tagaa?

*Dhegaha*

*Waxa aan leeyahay laba dhegood.*



*Dhegaha ayaa aan wax ku máqlaa.*



*Dhegaha waxa aan ku nadiifiyaa walax jilicsan.*



*Marka dheguu i xanuunaan waxa aan u tagaa takhtar.*

*Layli*

1. Halkee ayaa ay dheguu jidhka kaga yaalliiin?
2. Maxaa ay dheguu innoo taraan?
3. Walxaha adag iyo kuwa jilicsan midkee dhegaha lagu nadiifiyaa?

**Timaha**

*Waxa aan leeyahay timo qurxoon.*

*Timuhu waxa ay iga celiyaan kulka iyo qabowga.*




*Timahayga waxa aan ku nadiifiyaa biyo iyo saabuun.*

*Timahayga wax aan ku feedhaa saqaf.*

**Layli**

1. Halkee ayaa ay timuhu jidhka kaga yaalliiin?
2. Sheeg laba faa'iido oo ay timuhu innoo taraan.
3. Sidee ayaa timaha loo daryelaa?

**Gacmaha.**

*Waxa aan leeyahay laba gacmood.*

*Gacmaha ayaa aan wax ku qaadaa.*



*Gacmaha waa aan dhaqdaa.*

*Ciddiyaha waa aan iska jaraa.*

**Layli**

1. Sheeg laba faa'iido oo ay gacmuuhi innoo taraan
2. Wax ka sheeg siyaabaha gacmaha loo daryeelo.
3. Immisa ciddiyadood ayaa gacma-haaga ku yaal?

Lugaha.



*Waxa aan leeyahay  
laba lugood oo  
aan ku socdo.*



*Kabo la'aan lama  
socdo weligaa.*



*Lugaha waa  
la dhaqaa.*



*Ciddiyaha lugaha  
waa la iska jaraa.*

*Layli*

1. *Immissa farood ayaa lugaha dadka ku yaal?*
2. *Maxaa ay luguhu innoo taraan?*
3. *Wax ka sheeg siyaabaha lugaha loo daryeelo?*

Dhirta

*Dhirtu waa noole.*



*dhirtu waa noole. Dhirtu iskeed uma socon karto sida xayawaanku u socdo.*

*Layli*

1. *Dhirtu ma nooshahay mise waa ma-noole?*
2. *Dhirtu ma socon kartaa sida xayawaanka?*
3. *Sheeg saddex ka mid ah astaamaha noolaha oo ay leedahay dhirtu.*

*Qaybaha geedka.*




*Geedku waxa uu ka kooban yahay xidid, jirrid, caleen, ubax iyo midho.*

*Layli*

1. Sheeg qaybaha geedku ka kooban yahay.
2. Sheeg qaybta u dhaxaysa xididka iyo caleenta.
3. Maxaa loo yaqaan qaybta geedka ugu hooseysa?

*xididdada*




*Xididdadu waa qaybta geedka ugu hooseysa badanaa dhulka ayaa ay ku aasan yihiin.*

*Xididdada qaarkood waa la cunaa qaarna lama cuno.*


*Layli*

1. Halkee ayaa uu xididku geedka kaga yaal?
2. Xididdada dhirtu ma isku wada mid baa mise waa ay kala duwan yihiin?
3. Sheeg laba geed oo xididdadooda la cuno iyo laba aan la cunin.

*Jirridda.*

*Jirridda geedku waa qaybta ka sarraysa xididka. Jirridaha qaarkood kor ayaa ay u baxaan, kuwana dhulka ayaa ay raacaan.*

1. Halkee ayaa ay jirriddu geedka kaga taal?
2. Sheeg laba geed oo jirriddoodu kor u baxdo iyo laba ay dhulka raacdoo.
3. Sheeg laba geed oo jirriddooda dadku cuno.

*Caleenta.*

*Caleentu waa qaybta cagaaran ee geedka waxa ayna geedka kaga taal jirridda ama laamaha.*

*Caleemaha qaarkood waa la cunaa kuwana lama cuno.*

*Layli*

1. Halkee ayaa ay caleemuhi geedka kaga yaalliin?
2. Waa maxay midabka ay caleemuhi ugu badan yihiiin?
3. Sheeg laba geed oo caleentooda dadku cuno iyo laba aanu cunin.

9.6


*Ubax.*

*Dhirtu waxa ay bixiyaan ubaxvo ku kala duwan xagga midabka iyo qaabka. Ubaxyada qaar waa casaan, kuwo waa hurdi, kuwo waa cagaar kuwo kalena waa caddaan.*

*Layli*

1. Xaggee ubaxu geedka kaga yaallaa?
2. Sheeg ubaxyada aad taqaanno midabbadooda?
3. Sheeg saddex geed oo ubax leh oo aan ahayn kuwa halkan ka muuqda.

10.1


*Midho*

*Dhirta qaarkeed waxa ay bixisaa midho. Midhaha qaarkood waa la cunaa, qaarna lama cuno.*

*Layli*

1. Sheeg saddex geed oo midho bixiya.
2. Magacow laba geed oo midhahooda la cuno iyo laba aan midhahooda la cunin.
3. Halkee ayaa ay midhuhu geedka kaga yaalliin?

10.2


**Xabuub**

Dhirta qaarkeed sida galleyda, sarreenka  
yo digirtu waxa ay bixiyaan xabuub.  
Xabuubta dhirtu waxa ay ku kala duwan  
tahay xagga midabka, baaxadda iyo  
qaabka.

Layli

1. Magacow saddex geed oo xabuub  
bixiya.
2. Halkee ayaa uu sabuulku kaga yaal  
galleyda iyo meseggada?
3. Maxaa ay ku kala duwan yihii  
xabuubta digirta iyo kuwa meseggada?

10.3

**Naqtiiin "Qaybaha geedka".**

Xubnaha dhirtu ka kooban tahay waa  
xidid, jirrid, caleen ubax iyo midho ama  
xabuub.

Layli

1. Sheeg qaybaha uu geedku ka kooban  
yahay iyo mid walba halka ay kaga taal.
2. Ma taqaan saddex geed oo midha-  
hooda la cuno?
3. Cambaha iyo meseggada midkee ayaa  
xabuub dhala?

10.4

Xannaanada dhirta  
Nafaqaynta dhirta.



Dhirtu waxa ay u baahan tahay biyo fiican  
iyo in carrada loo jilciyo si ay u baxdo.

Layli

1. Dhirtu biyo la'aan ma bixi kartaa?
2. Carrada adag iyo tan la jilciyey middee  
dhirtu hagaag uga baxdaa?
3. Inta aan dhulka wax lagu beerin maxaa  
lagu sameeyaa?

10.5


Daaweynta dhirta.



Dhirta sida xayawaanka ayaa cudurro ku  
dhacaan.

Dhirtu waxa ay u baahan tahay daaweyn.  
Layli


1. Dhirta cudurro ma ku dhacaan?
2. Dhirtu daaweyn ma u baahan tahay?
3. Sidee dhirta cudurrada looga  
daweeyaa?

*Jaridda iyo gubidda dhirta*

*Dhirtu waxa ay u baahan tahay daryeel, sidaa darteed waa in laga ilaaliyaa goynta iyo gubidda.*

*Layli*

1. *Sheeg laba siyaabood oo dhirta wax loo yeelo?*
2. *In la gubaa dhirta ma habboon tahay?*
3. *In la jaro iyo in la beero dhirta midkee habboon?*



*Naqtiin "Xannaanada dhirta".*

*Dhirtu sida xayawaanka waxa ay u baahan tahay xannaano, la'aanteedna waa ay baaba'daa.*

*Layli*

1. *Dhirtu ma u baahan tahay daryeel?*
2. *In la gubo iyo in la warabiyo dhirta midkee habboon?*
3. *Wax ka sheeg siyaabaha dhirta loo xannaaneeyo.*

*Waxtarka dhirta  
Dhirta cuntaa laga helaa.*







Cuntada aynnu cunno badankeeda waxa aynnu ka helnaa dhirta ay ka mid yihiin gallayda, meseggada, digirta iyo sarreenda

Layli

1. Magacow saddex geed oo cunto laga helo.
2. Dhirta oo dhan dadku cunto ma ka helaa?
3. Immisa cunto oo kala duwar aya galleyda laga sama, staa?

*Dhirta qalab ayaa laga samaystaa.*



Dhirta waxa laga samaystaa qalab kala duwan sida kuraas, miisas, sariiro, ulo, xeedhooyin iyo fandhaallo.

Layli

1. Magacow saddex walxood oo dhir laga sameeyey.
2. Immisa walxood oo dhir laga sameeyey ayaa dugsiga laga helaa?
3. Darmooyinka ma dhirta ayaa laga sameeyaa?

*Dhirta wax ayaa laga dhistaa.*





*Dhirta waxa aynnu ka dhisanna aqallo kala duwan. Mudullada, carshaanta, baraaakooyinka iyo aqal soomaaliga waxa laga dhisaa dhirta.*

*Layli*

1. Magacow guryaha dhirta laga dhisay ee degmadiina ku yaal?
2. Albaabka aqalkiinu maxaa uu ka samaysan yahay?
3. Looxaanta wax lagu dhisto halkee ayaa laga helaa?

*Dhirta waxa aynnu ka helnaa dhar.*



*Dharka aan xidhanno waxa laga sameeyaa dun.*


*dunta waxa laga helaa dhirta uu ka mid yahay codbigu.*

*Layli*

1. Surwaalkaagu maxaa uu ka samaysan yahay?
2. Dunta wax lagu tosho halkee laga helaa?
3. Magacow hal geed oo aynnu dun ka helno.

11.6

Dhirta waa la hadhsadaa.




Waxtarka dhirtu inoo leedahay waxaa ka inid ah in aynnu hadhsanno waqtiyada kulaylaho ah.

Layli

1. Magacow saddex geed oo la hadhsado.
2. Xooluhu ma hadhsadaan dhirta sida dadka?
3. Waqtigee ayaa dhirta la hadhsadaa?

12.1

Dhirta qurux ayaa loo beertaa.






Dhirta qaarkeed waxa loo beertaa qurux. Dhirtaas waxa lagu beeraa guryaha, beeraha nasashada iyo jidadka waaweyn.

Layli

1. Magaaladiinu ma leedahay dhir qurux loo beertay?
2. Halkee ayaa ay ku taal dhirtaasi?
3. Meesha dhirta leh, iyo meesha aan lahayn midkee ayaa qurxoон?

12.2

*Naqtiiin "Waxtarka dhirta"*



*Dhirta waxa aynnu ka helnaa cunto, dhar, qalab, hadh, qurux, waxna waa aynu ka dhisannaa.*

*Layli*

1. *Sheeg laba faa'lido oo ay dhirtu inoo leedahay?*
2. *Magacow saddex qalab oo aynnu dhirta ka samaysano.*
3. *Tiri cuntooyinka dhirta laga helo ee aad taqaanno.*

*Waxyeellada dhirta*

12.3

*Waxyeellada dhirta  
Dhirta sunta leh.*





*Dhirta qaarkeed waxa ay leedahay sun. Dhirtaa dadku ma cuno midhaheeda, calementeeda iyo xabagteeda midna.*

*Layli*

1. *Ma taqaan geed sun leh? Sheeg magaciisa.*
2. *Dhirta sunta leh dadku ma cunaa?*
3. *Sheeg laba geed oo aan sun lahayn oo la cuno.*

12.4


*Dhirta mukhaadaraadka ah.*

*Dhirta mukhaadaraadka ah waxa ka mid ah buuriga oo sigaarka laga sameeyo. Sigaarku dhibaato ayaa uu u geystaa caafimaadka qofka.*

*Layli*

1. *Immisa geed oo mukhaadaraad ah ayaa taqaan? Magocow.*
2. *Sigaarka in la cabbaa ma fiican tahay?*
3. *Cunidda qaadku dhibaato ma leedahay? Sharax.*

12.5

*Dhirta qodaxda leh.*

*Dhirta qodaxda lihi waxa ay dadka u geystaan dhibaato. Dhirtaa waxa ka mid ah tiinka, qudhaca iyo cadaadda.*

*Layli*

1. *Dhirta qodaxda lihi sidee ayaa ay dadka dhibaato ugu geystaan?*
2. *Sheeg saddex geed oo qodax leh oo aan ahayn kuwa kor ku qoran.*
3. *Weligaa qodaxi ma ku mudday. Maxaa aad dareentay?*

*Naqtiiin "Waxyeellada dhirta".*







*Dhirta qaarkeed sida qaadka iyo tubaak-adu waxa ay u daran yihiin caafimaadka qofka, qaar kalena waa sun sida dhunkaasha, kuwana waxa ay leeyihiin qodax.*

*Layli*

1. *Sheeg laba waxyello oo ay dhirtu innoo leedahay?*
2. *Qaadka iyo tubaakadu maxaa ay waxyello ama dhibaato leeyihiin?*
3. *Dhirta qodaxda lihina dhibaato ma innoo leeyihiin? Wax ka sheeg.*

*Cuntada*

*Cuntada dadka.*







*Dadku waxa uu u baahan yahay cunttooyin kala duwan. Cuntada waxa ay ka kooban tahay calalis sida soorta iyo cabbid sida caanaha.*

*Layli*

1. *Magacow afar cunto oo degmadiinna laga cuno.*
2. *Caanuhu ma cuntaa?*
3. *Sheeg laba cunto oo calalis ah iyo laba cabbid ah.*

13.2





*Ilaha cuntada.*

*Cuntooyinka qaarkood sida hilibka, ukunta iyo caanaha waxa aynnu ka helnaa xayawaanka, qaar kalena sida bariiska waxa aynnu ka helnaa dhirta.*

*Layli*

1. Magacow afar cunto oo aynu xaya-waanka ka helno.
2. Tiri cuntooyinka dhirta laga helo ee aad cuntid.
3. Ukunta iyo canjeerada midkee ayaa xayawaanka laga helaa?




13.3

*Cuntooyinka la karsho.*

*Cuntooyinka qaarkood sida hilibka, digirta iyo soorta waa la kariyaa. Karintu cuntada waa ay bislaysaa, macaanaysaa, cudurradana waa ay ka dishaa.*

*Layli*

1. Tiri cuntooyinka la kariyo ee aad cunto.
2. Midkee ayaa macaan hilibka karsan iyo midka cayriin?
3. Hilibka aan la karin waxyeello ma leeyahay? Sharax.

**Cuntooyinka aan la karin.**

*Cuntooyinka qaarkood sida mooska, liinta, cambaha, babayga iyo qaruhu uma baahna in la kariyo ee sidooda ayaa loo cunaa marka la dhaqo.*

*Layli*

1. *Immisa cunto oo aan la karin ayaa guri-giinna laga cunaa?*
2. *Sheeg saddex cunto oo kale oo aan u baahnayn in la kariyo.*
3. *Hilibka iyo mooska midkee ayaa la cuni karaa isaga oo aan la karin?*

**Waxtarka cuntada.**

*Cuntadu waxtar kala duwan ayaa ay innoo leedahay. Cuntada jidhkeenna ayaa ku kora, cudurradana waa ay innaga ilaalisa, waxnawaaaan ku qabsannaa. Layli*

1. *Sheeg saddex faa'iido oo ay cuntadu innoo leedahay?*
2. *Cunto la'aan ma noolaan kartaa?*
3. *Qofka wax cuna iyo qofka aan waxba cunin midkee hawl qabsan kara?*

**"Naqtiiin" Cuntada.**




Dadku waxa uu u baahan yahay cunttooyin kala duwan in uu cuno. Cuntooyinkaasi qaar waxa laga helaa xayawaanka, qaarna dhirta.

Layli

1. Sheeg laba cunto oo laga helo xaya-waanka iyo laba laga helo dhirta.
2. Babayga iyo digirta midkee ayaa karin u baahan?
3. Sheeg laba dhibaato oo ay leedahay cunto la'aantu?

**Maatar**

**Kala duwanaanta maatarka.**







Agagaarkeenna waxa laga helaa maatar kala duwan. Maatarku waxa uu ka kooban yahay noole iyo ma-noole.

Layli

1. Sheeg afar maatar oo fasalka kaaga muuqda.
2. Maatarka oo dhammi ma-noolaa?
3. Sheeg laba maatar oo noole ah iyo laba ma-noole ah.

14.4





*Dhalaalinta adkaha.*

*Adkayaasha qaakood sida shamaca, burcadda, barafka iyo xaydu sahal ayaa ay u dhalaalaan marka la kululeeyo, qaarkoodna ma dhalaalaan sida qoryaha iyo waraaqaha.*

*Layli*

1. Adkaha dhammaantiis ma dhalaalaa marka dab la saaro?
2. Sheeg saddex adke oo dhalaala marka dabka la saaro.
3. Burcadda iyo dhuxusha midkee ayaa dhalaala marka dabka la saaro?

14.5




*Gubashada adkaha.*

*Adkayaasha qaarkood sida dhirta iyo waraaquhu marka la gubo waxa ay noqdaan dambas, qaarkoodna ma noqdaan dambas sida carrada iyo barafka.*

*Layli*

1. Immisa adke oo dambas noqda marka la gubo ayaa aad taqaan?
2. Adkayaasha oo dhammi ma dambas ayaa ay noqdaan marka la gubo?
3. Waraaqaha iyo barafka midkee ayaa dambas noqda marka la gubo?

Hoor.



*Caanaha, biyaha, saliidda, alkoolada iyo cadarku waa hoor. Hoorarka qaarkood waxa laga garan karaa urtooda.*

*Layli*

1. Magacow afar hoor oo gurigiinna laga helo.
2. Sheeg laba hoor oo urtooda lagu garan karo.
3. Biyaha iyo gaaska midkeey ayaa leh ur lagu garan karo?

Kala duwanaanta hoorarka.




*Biyaha, caanaha iyo saliidda ma ku kala duwan yihiin taabashada?*



*Biyaha, caanaha iyo saliidda kee ayaa ugu hor qallalaya, keebaase ugu dambaynaya?*


Hoor,	midab	taabasho	qallalid	shubid.
biyo,				
caano,				
saliid,				

15.2

*Hoorarka gubta.**Layli**Hoorarkan kuwee ayaa gubta?**Hoorarka gubta kuwee ayaa ugu olol cad?*

<i>Walax</i>	<i>Gubta</i>	<i>Ugu olol cad</i>
<i>Biyo</i>		
<i>saliid</i>		
<i>Caano</i>		
<i>Gaas</i>		

15.3

*Faraqa adkaha iyo hoorka.**Adkaha iyo hoorku maxaa ay ku kala duwan yihiin?**Layli*

1. *Biyaha bakeeriga ku jira haddii quraarad lagu shubo qaabkoodu ma isbeddelayaa?*
2. *Miiska haddii meel kala la geeyo qaabkiisu ma isbeddelayaa?*
3. *Dhagaxu keligii ma istaagi karaa?*
4. *Caanuhu haddii aan weel lagu shubin keligood ma istaagi karaan?*

*Naqtiiñ "Wajiyada maatarka".*




*Maxaa ey ku kala duwan yihiin?*

*Layli*

<i>Walax,</i>	<i>Ugu adag,</i>	<i>Qaab go'an,</i>	<i>Keligii istaagi karo,</i>	<i>Gacanta laguqab an karo</i>
<i>Adke,</i>				
<i>Hocr,</i>				
<i>Neef.</i>				

*Culayska.*




*Walxahan kee ayaa ugu culus, kee baase ugu fudud?*

*Layli*

<i>Walax,</i>	<i>Ugu culus,</i>	<i>Ugu fudud,</i>
<i>Bir,</i>		
<i>Qori,</i>		
<i>Dhagax,</i>		
<i>qalin,</i>		

## Qaadka weelasha.




Walxahan kee ayaa ugu qaad weyn?

Layli

1. Weelashan midkee ayaa ugu qaad weyn?
2. Maxaa aad ku garanaysaa ka ugu qaad yar?
3. Tabtee ugu wanaagsan ee aad ku kala garan kartaa qaadka weelka labaad iyo weelka afraad?

## Dhererka walxaha.





Sidee ayaa laba walxood midka dheer loo soo saari karaa?

Layli

Walax	Dhererka walaxda			
Miis	Suxul	Taako	Far	Xubnood
Kursi				
Fasalka				

16.4

*Siyaabaha loo dhaansado.*




*Sidee ayaa aynnu ku helnaa biyaha  
aynnu aqalladeenna ku isticmaalno?*

*Layli*

1. *Magacow saddex siyaabood oo biyaha loo dhaansado.*
2. *Immisa xayawaan ayaa biyaha lagu dhaansadaa degmadiinna?*
3. *Sheeg qalabka biyaha lagaga dhaansado degmadiinna?*

16.5

*Noolaha biyaha ku nool.*




*Nafley fara badan ayaa laga helaa biyaha dheddooda.*

*Maxaa ka mid ah?*

*Layli*

1. *Magacow saddex xayawaan oo biyaha ku nool.*
2. *Dhirtu biyaha ma ka dhex bixi kartaa? Magacow.*
3. *Xayawaannada iyo dhirtaasi biyo la'aan ma noolaan karaan?*

*Dabbaasha biyaha.*

*Dabbaashu waa ay fiican tahay.  
Biyah ee ayaa ku habboon in lagu  
dabbaasho?*

*Layli*

1. *Biyaha fadhiya ee wasakhda leh in lagu dabbaasho ma fiican tahay?*
2. *Adiga oo aan dabbaasha aqoon, haddii  
aad meel gun dheer ku dhacdo maxaa  
ku helaya?*
3. *Magacow saddex meelood oo lagu  
dabbaalan karo.*


*Naqtiiin “Døegaanka biyaha”*

*Biyaha aynnu u baahan nahay waxa  
aynnu ka helnaa deegaankeenna. Wax  
dhibaato ah ma innoo leeyihiiñ biyuhu?  
Layli*

1. *Si kooban u sharax sida aynnu ku  
helno biyaha aan isticmaalno.*
2. *Sheeg laba xayawaan oo dadka waxy-  
eela oo biyaha laga helo.*
3. *Weligaa kaneecoo ma ku qaniintay?  
Halkee ayaa laga helaa kaneecada?*

17.2

*Noolaha iyo biyaha*



*Dhirta iyo xayawaanku biyo la'aan ma noolaan karaan?*

*Layli*

1. *Haddii ay dhirta iyo xayawaanku biyo waayaan maxaa ku dhacaya?*
2. *Xaggee ayaa ay dhirtu biyaha ka heshaa?*
3. *Sheeg saddex meelood oo ay xayawaanku biyaha ka helaan.*

17.3

*Biyaha waa aan isku nadiifinnaa.*




*Sidee ayaa aynnu biyaha jirkeenna ugu nadiifinnaa?*

*Layli*

1. *Maxaa aynnu jirkeenna ku nadiifinnaa?*
2. *Sheeg saddex siyood oo aynnu biyaha jirkeenna ugu nadiifinno.*
3. *Haddii aynnu biyo wayno maxaa jirkeenna ku dhacaya?*

*Biyaha waxbaa lagu dhaqdaa.*



*Biyuhu lagama maarmaan ayaa ay u yihii nadaafadda.*

*Immisa siyaabood ayaa aynnu biyaha dharka iyo maacuunta ugu nadliifsannaa?*

*Layli*

1. *Midkee ayaa habboon in wax lagu cuno weel nadiif ah iyo mid wasakh ah? Sheeg sababta.*

2. *Maxaa aynnu maacuunka ku nadliitsannaa?*

3. *Si dharku nadiif u noqdo maxaa lagu sameeyaa?*

*Biyaha waxbaa lagu karsadaa.*




*Waxa aynnu u baahan nahay cunto bisil in aynnu cunno.*

*Cuntooyinkee ayaa u baahan in biyo lagu kariyo?*

<i>Cunto</i>	<i>biyo ayaa lagu kariyaa.</i>
<i>Bariis,</i>	✓
<i>Liin,</i>	X
<i>Digir,</i>	
<i>Baasto,</i>	
<i>Babay,</i>	
<i>Hilib,</i>	
<i>Carbe.</i>	

*Biyaha waa lagu safraa.*



*Biyuhu kaalin weyn ayaa ay ka qaataan socdaalka.*



*Maraakiibta iyo doonyuhu halkee ayaa ay maraan?*

*Layli*

1. *Badaha iyo webiyada ma laga tallaab karaa?*
2. *Maxaa lagaga tallaabaa?*
3. *Maraakiibta iyo doonyuhu biyo la'aan ma socon karaan?*

*Naqtiiin guud*

*Sawirradan mid walba maxaa "" muujinaya?*



19.1

*Wasakhowga biyaha.*




Dadku waxa uu u baahan yahay in uu  
helo biyo nadiif ah. Biyaha waskahda lihi  
ma ku habboon yihiin in la cabbo?

*Layli*

1. *Sheeg saddex siyaabood oo ay biyuhu u wasakhoobaan.*
2. *Ceeelasha laga cabbo sidee ayaa wasakhda looga ilaalil karaa?*
3. *Meeelaha laga cabbo sida barkadaha in lagu dhex qubaystaa ma habboon tahay?*

19.2

*Milanka biyaha.*




*Walxaha qaar biyaha ayaa ay ku milmaan,  
kuwana kuma milmaan  
Walxahan kuwee biyaha ku milma  
kuweese aan ku milmin?*

*Layli*

<i>Walax,</i>	<i>Biyaha ku milma,</i>	<i>Biyaha aan ku milmin.</i>
<i>Cusbo,</i>		
<i>Dhagax,</i>		
<i>Bir,</i>		
<i>Sonkor,</i>		
<i>Bariis,</i>		
<i>Taydh (Oomo).</i>		

*Waxyaabaha aynnu biyaha ka helno.*




*Waxyaaboo badan ayaa aynnu badda ka helnaa.*

*Maxaa ka mid ah waxyabahaas?*

*Layli*

1. *Kalluunka xaggee ayaa aynnu ka helnaa?*
2. *Sheeg hal xayawaan oo aynnu badda ka helno oo qurxin loo isticmaalo.*
3. *Cusbada aynnu cuntada ku darsanno halkee ayaa laga helaa?*

*Naqtiiin "Biyaha".*




*Biyuhu kaalin weyn ayaa ay kaga jiraan nolosheenna.*

*Sidee ayaa aynnu biyo nadiif ah ku heli karnaa?*

*Layli*

1. *Sheeg afar faa'iido oo ay biyuhu innoo leeyihiiin.*
2. *Ma habboon tahay in biyaha webiyada iyo balliyada sidooda loo cabbaa?*
3. *Sheeg laba siyaabood oo biyaha was-akhda looga ilaalin karo.*

*Hawada*  
*Maxaa jiritaanka hawada*  
*lagu garan karaa?*




*Hawada ma aragno ee waa aynnu dareennaa.*  
*Sidee ayaa aynnu ku garan karnaa jiritaanka hawada?*

*Layli*

1. *Maro qoyan haddii meel aan qorrax lahayn lagu wadho ma qallalaysaa?*  
*Maxaa qallajiyey?*
2. *Gacantaada haddii aad afuufto maxaa aad dareemaysaa?*
3. *Sheeg laba siyaabood oo lagu muujin karo jiritaanka hawada?*

*Hawada meel walba waa laga helaa.*



*Hawada meel walba waa laga helaa.*  
*Sidee ayaa loo hubin karaa?*

*Layli*

1. *Maxaa inna tusi kara in ay hawo innagu wareegsan tahay?*
2. *Hawada aynnu neefsanno halkeen ayaa aynnu ka helnaa?*
3. *Koob af bannaan haddii aad foorariso maxaa ku jiri kara?*

Xoogga hawada.




Sidee ayaa loo hubin karaa in ay hawadu xoog leedahay?

Layli

1. Sheeg wax ku tusin kara in ay hawadu xoog leedahay.
2. Marka aad dhinaca hawada ka manayso u ordaysyo maxaa aad dar-eentaa? Sheeg sababta.
3. Marka aad dhinaca hawadu ka imanayso u ordaysyo iyo marka aad ka soo ordaysyo markoo ayaa aad dheer-aysaa? Sheeg sababta.

Hawadu wax ma dhaqaajin kartaa?



Hawada ma aragno ee waxa ay samayso ayaa aynnu aragnaa. Hawadu wax ma dhaqaajin kartaa?


Layli

Walxahan kuwee ayaa ay hawadu ana-qajin kartaa?

Walax,	Dhaqaajin kartaa,	Ma dhaqaajin
Caleenta geedaha,		
Dhagax		
Waraaqa yaryar,		
Guri,		
Dambas.		

20.3

Dabaysha.




Hawada socodkeedu aad u badan yahay  
maxaa loo yaqaan?

Layli

1. Sheeg laba walxood oo lagu garan  
karo in ay dabayli jirto.
2. Magacow laba walxood oo aan lagu  
garan karin in ay dabayli jirto iyo in  
kale.

20.4

Naqtiin "Hawo".



Hawada meel kasta miyaa laga helaa?

Layli

1. Hawada xaggee laga helaa?
2. Fasalka aad ku jirto haddii daaqadaka  
iyo albaabka laga xidho hawo ma ku  
jirtaa?
3. Sheeg laba siyaabood oo lagu garan  
karo in ay hawo jirto.

Hawada waa la nefsadaa.



Hawadu iagama maarmaan ayaa ay u tahay noolaha.


Intee ayaa aad joogi kartaa neefsii la'aan?

Layli

Walxahan kuwee ayaa hawo la'aan jiri kara?

Walax.	Hawo uma-baahna.	Hawo u baahan.
Sac,		
Buug,		
Kursi,		
Geed,		
Qof,		
Koob,		
Shimbir.		

Hawa la'aan lama duuli karo.




Walxo kala duwan ayaa duula. Hawo la'aan ma duuli karaan walxahaasi?

Layli

Waxlahan kuwee ayaa hawada ku duula?

Walax,	Hawada ku duula,	Hawadakumaduulo
Dayaarad		
Shinni		
Baabuur		
Kaneeco		
Aqal		
Tuke		
Gorayo.		

*Hawo la'aan dabku ma baxo.*




*Dabku lagama maarmaan ayaa uu yahay nolosha.*

*Hawo la'aan dab ma heli karnaa?*

*Layli*

1. *Dabka marka la hurinayo halkee ayaa la dhigaa?*  
*Waa maxay sababta?*
2. *Dabka meel dugsi ah la dhigo iyo dabka meel bannaan la dhigo kee ayaa dhaqso u baxaya?*
3. *Marka la rabo in dabku dhaqso u baxo maxaa lagu sameeyaa?*

*Adeegsiga hawada.*



*Hawadu waxa ay leedahay xoog. Xoogga hawada ma la adeegsan karaa?*

*Layli*

*Walxahan kuwee ayaa hawo ku shaqeeya?*

<i>Walax,</i>	<i>Kushaqeeyahawo,</i>	<i>Kumashaqeeyohawo</i>
<i>Dooni shiraac leh,</i>		
<i>Baaskiih</i>		
<i>Abbitey</i>		
<i>Mooto,</i>		
<i>Ceeelasha qaarkood.</i>		

21.3

*Naqtiiin "Waxtarka hawada".*




*Hawadu nolosheenna lagama maarmaan  
ayaa ay u tahay.  
Immisa siyaabood ayaa ay hawadu wax  
innoogu tartaa?*

*Layli  
Erayadan mid walba meesha ku habboon  
ku buuxi.  
naafsadaa, duulaan, shidmo.  
1. Xayawaanku hawada waa uu \_\_\_\_\_  
2. Shimbiruhu hawada waa ay ku \_\_\_\_\_  
3. dabku hawo la'aan ma \_\_\_\_\_*

21.4

*Wasakhowga hawada.*




*Waxa aynnu u baahan nahay in aynnu  
neefsanno hawo nadiif ah. Hawadu ma  
wasakhowdaa sida biyaha?  
Layli  
Walxahan kuwee ayaa hawada  
wasahkeeyaa?*

<i>Walax</i>	<i>Wasakheeyaa hawada</i>	<i>Aan wasakheyn hawada.</i>
<i>Sigaar</i>		
<i>Cadar</i>		
<i>Biyo</i>		
<i>Baaduur</i>		
<i>Baaskiil</i>		
<i>Bakhu</i>		

21.5

*Waxyeellada dabaysha.*



*Dabayshu wax dhibaato ah ma innoo  
geysataa?*

*Layli*

1. *Weli ma aragtay dhibaato ay dabayli  
keentay? Sheeg.*
2. *Siigada maxaa kiciya?*
3. *Waqtiga dabaysha badani jirto dhi-  
baato ma dareentaa?  
Wax ka sheeg.*

122

21.6

*Naqtiin "Waxyeellada hawada".*



*Hawada caafimaadkeenna iyo hantid-  
eenna wax dhibaato ah ma u geysataa?*

*Layli*


*Erayadan mid walba meesha ku habboon  
ku buuxi.*

*fincna, gubasho, neefsado.*

1. *Dabaysha xoogga lihi waxa ay  
dhallisa — — — — —*
2. *Hawada wasakhaysani caafimaadka  
uma — — — — —*
3. *Hawada wasakhaysan lama — — — — —*

123

Oogada dhulka.



Dhulka korkiisa oo dhammi ma isku midbaa?

Layli

1. Dhagaxaanta ma dhulka oogadiisa ayaa laga helaa?
2. Muuqaalka degmadiinu maxaa uu u badan yahay?
3. Sheeg saddex muuqaal oo dhulka oogadiisa laga helo.

Kala duwanaanta dhagaxaanta.



Dhagaxaanta dhulka korkiisa laga helaa ma isku wada midbaa? Maxaa ay ku kala duwan yihiin?

Layli

1. Dhagaxaanta immisa siyaabood ayaa aad ku kala sooci kartaa? Sheeg.
2. Midabkee ayaa ay u badan yihiin dhagaxaanta aad taqaanaa?
3. Dhagaxaantu ma kala jilicsan tahay? Maxaa aad ku kala garan kartaa?

22.3

*Dhagaxda carro ma loo rogi karaa?*



*Dhulka waxa laga helaa carro iyo dhagax kala duwan.*


*Dhagaxda carro ma loo rogi karaa?*

*Layli*

1. *Halkæ ayaa ay kyla tahay in carradu ka timid?*
2. *Dhagaxda haddii la burburiyo ,maxaa ay noqotaa?*
3. *Sheeg laba siyood oo carrada dhagax loogu rogi karo.*

22.4

*Dhumucda carrada.*




*Carro madowda, carro cadka iyo bataaxu waa ay kala xabbad weyn yihiin. Sidee ayaa aad ku hubin kartaa?*

*Layli*

*Carrooyinkan middeé ayaa ugu xabbad weyn?*

<i>Carro,</i>	<i>Ugu xabbad weyn,</i>	<i>Dhexdhe-xaad,</i>	<i>Ugu xabbad yar.</i>
<i>Carro - madow</i>			
<i>Carro-cad,</i>			
<i>Bataax.</i>			

Kala duwanaanta carrooyinka  
qoyan.




Carra-madowda, carra-cadda iyo  
bataaxa midkee ayaa ugu hor qallala  
marka la qooyo?

Layli

Carrooyinkan midkee ayaa ugu hor qal-  
lasha marka la qooyo?

Carro,	Ugu hor - gallasha,	Dhexdhe- xaad,	Ugu- dambaysa.
Carro- madow.			
Carro-cad.			
Bataax.			

Biya haynta carrooyinka.



Carra-madowda, carra-cadda iyo  
bataaxa midkee ayaa biyaha muddo  
dheer hayn karta?


Layli

Carrooyinkan middee ayaa ugu biyo  
hayn dheer?

Carro,	Ugu hayn- dheer.	Dhexdhe- xaad.	Ugu liidata.
Carra- madow			
Carra-cad			
Bataax.			

23.1

*Naqtiiin "Kala duwanaanta carrada".*



*Carrada dhulka korkiisa laga helaa dhammaanteed ma isku wada midbaa?*

*Layli*

1. *Sheeg saddex siyood oo ay dhagaxantu ku kala duwan tahay.*
2. *Currada midabkeedu ma. isku wada midbaa?*
3. *Carra-madowda iyo bataaxda middee xabbad weyn?*

23.2

*Carrada guryo ayaa laga dhistaan.*



*Immisa siyood oo kala duwan ayaa aynnu carrada guryaha ugu dhisanna?*

*Layli*

1. *Fasalkaaga dhismihiisa carro ma ku jirtaa? Tilmaan.*
2. *Carro la'aan guryaha ma la dhisikaraa?*
3. *Guriga dhagaxa ah dhismihiisa carro ma ku jirtaa?*

23.3

*Carrada qalab ayaa laga samaystaa.*




*Carrada immisa qalab oo kala duwan  
ayaa laga samaynsan karaa?*

*Layli*

1. *Sheeg nooca carrada ugu habboon in qalab laga samaysto.*
2. *Sheeg nooca ugu liita carrada in qalab laga samaysto.*
3. *Magacow saddex shay oo ka mid ah qalabka carrada laga samaysto iyo mid walba waxa lagu isticmaalo.*

23.4

*Xooluhu carro ayaa ay u baahan yihiin.*



*Carrada meel kasta laga helo miyaa la siiyaa xoolaha?*

*Layli*

1. *Carrada xoolaha oo dhan ma la siiyaa?*
2. *Marka xooluhu carro u baahdaan maxaa la yidhaahdaa?*
3. *Maxaa carrada xoolaha loo siiyaa?*

23.5

*Carrada waxbaa laga beertaa.*



*Carrooyinka ma isku si ayaa wax uga  
baxaan?*

*Layli*

1. *Carrada bataaxda ah wax ma ka  
baxaan?*
2. *Carro cadka iyo carro-madowda mid-  
keebeeraha ku habboon?*
3. *Dhulka quruuruxa leh beerashada ma  
ku habboon yahay?*

23.6

*Naqtiin "Waxtarka Carrada".*




*Carrada immisa siyood oo kala duwan  
ayaa looga faa'iideysan karaa?*

*Layli*

1. *Sheeg saddex siyood oo carrada looga  
faa'iideysto.*
2. *Carro la'aan wax ma la beeran karaa?*
3. *Immisa nooc oo guryaha ka mid ah  
ayaa dhismahooda carro lagu  
isticmaalaa?*

24.2

*Waxtarka giraanta.*



24.1

*Qalab  
Aqal soomaali*



*Aqal soomaaliga maxaa ay nnu ka dhisanna?*



*Layli*

1. *Magacow shan ka mid ah qalabka aqal soomaaliga laga sameeyo.*
2. *Hararka halkee aqal soomaaliga laga saaraa?*
3. *Udubka iyo loolku maxaa ay ku kala duwan yihiin?*

*Giraanta siyaabo badan oo kala duwan ayaa aynnu uga faa'iideysanna.*

*Layli*


1. *Walxaha sida giraanta u samaysan iyo walxaha afar geeska ah midkee riixid-doodu fududahay?*
2. *Immisa siyood oo kala duwan ayaa deegaankiina giraanta looga faa'iideystaa?*
3. *Giraamuhu maxaa ay innoo taraan?*

*Khafiyadda.*

*Khafiyaddu waxa ay innoo fududeysaa  
qaadidda walxaha culus.*

*Layli*

1. *Immisa siyood ayaa aynnu u isticmaalaan  
naa khafiyadda?*
2. *Weligaa calan la saarayo ma aragtay?  
Maxaa la isticmaalaa?*
3. *Marka ceelasha biyaha lagala soo  
baxayo in khafiyad la isticmaalo iyo in  
gacanta la isticmaalo midkeen  
habboon?*


*Qaaddooyinka.*

*Qaaddooyinka waxa loo isticmaalaa  
siyaabo kala duwan. Immisa nooc oo  
qaaddooyin ah ayaa aad taqaan?*

*Layli*

1. *Sheeg afar siyood oo qaaddooyinka  
loo isticmaalo.*
2. *Qaaddada qoriga ka samaysan ee  
miyiga wax looga cuno maxaa loo  
yaqaan?*
3. *Ku sawir buuggaaga saddex qaaddo  
oo kala duwan.*

Koobabka.




*Immisa siyaabood oo kala duwan ayaa koobabka loo isticmaalaa?*

*Layli*

1. *Sheeg laba siyood oo koobabka loo isticmaalo.*
2. *Koobabka jaandiga (macdanka) ah iyo kuwa quraaradda ka samaysan kuwée ayaa ku habboon in shaaha kulul lagu cabbo?*
3. *Sawir afar koob oo noocoodu kala duwan yahay.*

Naqtiin "Qalab".



*Qalabka kala duwan ee sawirradan ka muuqda mid walba maxaa uu innoo taraa?*


*Layli*

*Erayadan mid walba meesha ku habboon ku buuxi.*

*Qaadidda, Riixidda, Cabbo.*

1. *Khafiyadda waxa ay innoo fududeysaa kor u —— walxaha culus.*
2. *Giraantu waxa ay sahashaa —— walxaha culus.*
3. *Koobabka waxa loo isticmaalaa in wax lagu —— .*

*Qalabka najaarrada.*



*Qalabka kore mid walba maxaa loo isticmaalaa?*

*Layli*

*Erayadan mid walba meesha ku habboon  
ku buuxi.*

*siibaa, gooyaa, garaacaa.*

1. *Miinshaarta wax ayaa lagu ——*
2. *Dubbada wax ayaa lagu ——*
3. *Kelbadda wax ayaa lagu ——*

*Qalabka birtumidda.*



*Qalabka kor ku sawiran mid walba maxaa  
loo adeegsadaa?*

*Layli*

*Erayadan mid walba meesha ku habboon  
ku buuxi.*

*buufiyaa, tumaa, soofeeyaa.*

1. *Dubbaha waxbaa lagu ——*
2. *Soofaha waxbaa lagu ——*
3. *Buufiyaha waxbaa lagu ——*

*Qalabka kabatolidda.*



*Qalab kala duwan ayaa loo adeegsada  
kaba tolidda.*

*Layli*

<i>Qalab,</i>	<i>jeexaa,</i>	<i>garaacaa</i>	<i>daloo- liyaa,</i>	<i>siibaa,</i>
<i>biinsc (kelbad)</i>				
<i>dubbe</i>				
<i>kabatole</i>				
<i>mindi.</i>				

*Qalabka dhartolidda.*



*Immisa qalab oo kala duwan ayaa loo  
isticmaalaa dhartolidda?*

*Layli*

*Qalabkan kuwee ayaa loo isticmaalaa  
dhartolidda?*

<i>Qalab,</i>	<i>dhartilodda loo isticmaalo,</i>	<i>Dhartolidda looma isticmaalo.</i>
<i>Maqas,</i>		
<i>Dubbe,</i>		
<i>Dun,</i>		
<i>Irbad,</i>		
<i>Miinshaar.</i>		

*Qalabka dhismaha.*




*Dhismahan immisa qalab oo kala duwan  
ayaa lagu isticmaalaa?*

*Layli*

*Qalabkan kee ayaa loo isticmaalaa  
dhismaha?*

<i>Qalab,</i>	<i>dhismaha waa</i>	<i>Dhismaha loo looisticmaalaa ma isticmaalo.</i>
<i>Majarafad,</i>		
<i>qaaddo (moqorof),</i>		
<i>irbad,</i>		
<i>fargas,</i>		
<i>sakeel</i>		
<i>qalin.</i>		

*Naqtiiin "Qalabka farsamada".*



*Qalabkan mid walba  
farsamadee ayaa loo  
isticmaalaa?*


*Layli*

*Erayadan mid walba meesha ku habboon  
ku buuxi.*

*Dhismaha, Kabatolidda, Birtumidda.*

1. *Middida waxa lagu isticmaalaa —*
2. *Buufinta waxa loo adeegsadaa —*
3. *Majarafadda waxa lagu isticmaalaa —*

Dhaqdhaqaqa walxaha.




Immisa ayaa walxahan dhaqdhaqaaq samayn kara?

Layli

1. Magacow afar walxood oo dhaqdhaqaq samayn kara.
2. Shimbiraha iyo dhagxaanta kuwee ayaa dhaqdhaqaaq samayn kara?
3. Sawir saddex walxood oo dhaqdhaqaq samayn kara iyo laba aansamayn karin.

Awoodda dhaqdhaqaqa walxaha.




walxaha kor ka muuqda kuwee iskood u dhaqaaqa? Kuweese la dhaqaajiya?

Layli

U kala saar walxahan k. wa la dhaqaajiyo iyo kuwa iskood u dhaqaaqa.

Walxaha,	La dhaqaajiyo	Iskood u dhaqaaqa
Nin,		
Markab,		
Ri',		
Baaskiilad		
Gaadhi-gacan,		
Bisad.		

*Walxaha hawada mara.*




*Walxaha kor ka muuqda kuwee iskood u duula? Kuweese la duuliya?*

*Layli*

*U kala saar walxahan kuwa hawada mara iyo kuwa aan marin.*

<i>Walax,</i>	<i>Hawada mara,</i>	<i>Hawada aan marin.</i>
<i>Balanbaalis</i>		
<i>Kalluun,</i>		
<i>Duqsi,</i>		
<i>Dameer,</i>		
<i>Diyaarad.</i>		


*Walxaha biyaha ku socda.*



*Layli*

1. *Geelu biyaha ma ku socdaa?*
2. *Looxu biyaha ma ku socdaa?*
3. *Weligaa ma aragtay walxo biyaha ku socda? Sawir.*

*Naqtiiin "Dhaqdhaqaaq".*




*Dhammaan walxahani dhaqdhaqaaq ma  
samayn karaan?*

*Layli  
Khaanadaha bannaan ku buuxi calaam-  
adaha (✓) iyo (✗) midba ta ku habboon.*

Walax,	Dhaqdhaqaaqi kara,	Ma dhaqd-haqaaci karo.
Faras,		
Buur,		
Dayax,		
Dirxi,		
Aqal,		
Baabuur.		


*Gaadiidka dhulka.*



*Gaadiidka dhulku faa'iidooyin badan  
ayaa uu innoo leeyahay. Maxaa aynnu u  
adeegsannaa gaadiidka dhulka?*

*Layli  
Gaadiidkan kee ayaa ah gaadiidka  
dhulka?*


Magaca gaadiidka,	gaadiidka dhulka,	Ma aha gaadiid-ka dhulka.
Faras,		
Markab,		
Baaškiił,		
Dayuurad.		
Awr.		

*Gaadiidka biyaha.*

*Gaadiidka biyuhu faa'iido badan ayaa uu innoo leeyahay. Sheeg siyaabaha kala duwan ee aynnu u adeegsanno.*

*Layli*

1. Maxaa aynnu u adeegsanna gaadiidka biyaha?
2. Gaadiidka biyuhu maxaa uu kaga duwan yahay gaadiidka dhulka?
3. Sheeg hal sabab oo gaadiidka biyuhu kaga faa'iido badan yahay gaadiidka kale.

*Gaadiidka cirka.*

*Gaadiidka cirku faa'iidooyin badan ayaa uu innoo leeyahay.*

*Maxaa ka mid ah faa'iidooyinkaas?*



*Layli*

*Ku buuxi erayadan mid walba meesha ku habboon:  
duulaan, raaca, dheereeyaan.*

1. Diyaaraduhu waa ay ka —— gaadiidka kale.
2. Diyaaraduhu waa ay ——
3. Diyaaradaha waa la ——

27.5

Dhaqdhaqaqa saacadda.



Saacaddu in ay shaqaynayo iyo in kale maxaa lagu gartaa?

Layli

Ku buuxi erayadan mid walba meesha ku habboon.

saacadda, dhaqdhaqaqa, gacan.


1. Saacaddu waxa ay samaysaa —

2. Waqtiga waxa lagu cabbirtaa —

3. Birta yar ee saacadda sheegta waxa la yidhaahdaa —

27.6

Naqtiiin "Gaadiidka".



Gaadiidkan mid walba halkee ayaa uu maraa?

Layli

Khaanadaha bannaan mid walba ku buuxi calaamadaha (✓) iyo (✗) ta ku habboon.

Gaadiid,	Dhulkamara	Hawadamara	Biyahamara
Baabuur,			
Diyaarad,			
Doon,			
Huudhi,			
Baaskiil,			
Markab.			
Awr.			

28.1

Ilays  
Habeen



Habeenku maxaa uu kaga duwan yahay  
maalinta?

Layli

Ku buuxi erayadan meelaha bannaan  
seexdaa, habeenkii, Xiddigaha

1. Habeenkii waxa soo baxa ——.
2. Cadda loolka waxaa la ciyaaraa ——.
3. Habeenkii waa la ——.


28.2

Qorraxda.



Qorraxdu waa kubbad gubanaysa.  
Qorraxda iyo dayaxa midkee ayaa weyn?  
Layli  
Ku buuxi erayadan meelaha ku habboon  
Galbeed, maalintii, Bari  
1. Qorraxda waxa la arkaa ——.  
2. Qorraxdu waxa ay ka soo baxdaa ——.  
3. Qorraxdu waxa ay u dhacdaa ——.

Maalin



*Maalintii maxaa aaad qabataa?*

*Layli*

1. *Sheeg saddex shaqo oo aad maalintii qabato.*
2. *Salaadda cishaha ma habeenkii baa la tukadaa mise maalintii?*
3. *Goorma ayaa la cunaa hadhimada (qadada)?*

Xiddigaha.



*Xiddiguuhu waa qorraxyo fog-fog.*

*Xiddigaha goorma ayaa aynnu aragnaa?*


*Layli*

*Erayadan ku buuxi mid walba meesha ku habboon*

*habeenkii, iftiin, fog*

1. *Xiddiguuhu waa ay ka —— yihiin qorraxda.*
2. *Xiddigaha waxa la arkaa ——.*
3. *Xiddiguuhu waxa ay leeyihiin ——.*

Dayaxa.



Muqaalka dayaxu had iyo jeer ma isku midbaa?

Layli

1. Dayaxa ma habeenkii oo keliya ayaa la arkaa?
2. Dayaxu marka uu cusub yahay maxaa loo yaqaan?
3. Habeenkii marka aanu dayaxu jirin maxaa loo yaqaan?

Naqtiiin "Ilayska".



Iftiin la'aan wax ma arki karnaa?

Layli

Khaanadaha bannaan ku buuxi calaam-adaha (✓) iyo (X) midba tan ku habboon.

Walax	waxa la ar- kaa maalintii	waxa la ark- aa habeenkii	waxa la ark- aa habeen iyo maalinba
Qorrax.			
Xiddigo			
Dayax.			

Ilaha Ilayska.



Ilayska waxa aynnu ka helnaa ilo kala duwan.


Ilahaas maxaa ka mid ah?

Layli

Khaanadaha bannaan ku buuxi erayada ku habboon.

Walax	Ilays ka helno	Ilays kamalumo
Xiddigaha		
Dhagaxa		
Laambad		
Buug		
Dayax		

Ilaha dabiiciga ah ee ilayska.







Waxyabaha iftiinka laga helo dhamaan ma dadka ayaa sameeya?

Layli

Khaanadaha bannaan ku buuxi calaamadaha (✓) iyo (X) midba ta ku habboon.

Walax	waa dabiici	Dabiici ma aha
Xiddigo		
Faynuus		
Nal		
Qorrax		
Dayex		
Dab		

*Ilaha ilayska ee dadsameega ah.*



*Ilaha ilayska ee kor ka muuqdaa dhammaantood waa dad samee.*

*Layli*

*Khaanadaha bannaan ku buuxi erayada ku habboon*

Walax	dadsamee	Dabiici
Dayax		
Faynuus		
Qorrax		
Laambad		
Xiddigo		

*Waxtarka ilayska.*



*Ilayska ma laga maarmi karaa?*

*Layli*


*Ku buuxi erayadan meesha ku habboon  
Ma habboona, ilayska, nal*

*1. baabuurta waxa ay habeenkii ku socdaan ——.*

*2. Meel mugdi ah in wax lagu akhristaa ——.*

*3. Maalintii waxa aynnu —— ka helnaa qorraxda.*

Wa qyeellada ilayska.



Ilaysku wax dhibaato ah ma leeyahay?

Layli

1. Qorraxda in la fiirsh a ma habboon tahay?
2. Qorraxdu marka ay dhacayso iyo duhurkli midkee ayaa ay aad u xun tahay in la fiirsho?
3. Ma taqaan ilays kale oo fiirintiisu dhibaato leeyahay?

Waxyaabaha la shito.




Ilahan ilaysku maxaa ay u baahan yihin si ay u shidmaan?

Layli

Khaaniadaha bannaan ku buuxi calaam-adaha (✓) iyo (X) midba tan ku habboon.

Ilo ilays	Gaas	Baytari	Koronto
Faynuus,			
Nal,			
Laambad,			
Toosh			
Tiriig			

"Naqtiiin" Ilaha ilayska




Ilays la'nan wax ma arki karnaa?

Layli

1. Magacow shan waxyaabood oo aan iftiin ka helno.
2. Qorraxda iyo nalka midkee ayaa dabi-ici ah, midkee ayaase dadsamee ah?
3. sawir afar waxyaabood oo laga helo iftiin.

Samaysanka hadhka.




Haddii aan ilays jirin hadh ma samaysmaa?

Layli

1. Mugdiga iyo ilayska, midkee ayaa aad hadhkaaga aragtaa?
2. Habeen cadda ah hadhkaaga ma aragtaa? Waayo.
3. HabeenGudcur(mugdi) ah hadhkaaga ma aragtaa? Waa maxay sababtu?

Qaabka hadhka.




Walax kasta qaabka hadhkeedu ma u eg  
yahay qaabka walaxda?

Layli

1. Walax kasta qaabka hadhkeedu sidee  
ayaa uu u eg yahay?
2. Haddii qofku laba gacmood leeyahay.  
Immisa gacmood ayaa ka muuqanaysa  
hadhkiisa?
3. Qaabka hadhka dameerku ma u eg  
yahay qaab dameer?

Dhaqdhaqaqa hadhka.




Haddii uu qofku dhaqaqa, hadhkiisuna  
ma la dhaqaqa?

Layli

Ku buuxi erayadan meesha ku habboon  
Subaxii, Duhurkii, Galabtii, Hadhkiisuna  
sameeyaa.

1. Dhaqdhaqaqa qofku sameeyo ayaa  
uu —— .
2. Hadhku waxa uu dheer yahay ——  
iyo —— .
3. Hadhku waxa uu ugu gaaban yahay  
—— .

*Waxtarka hadhka.*




*Hadhku wax faa'iido ah ma innoo  
eeyahay?*

*Layli*

1. *Marka qorraxdu kulushahay maxaa  
aynnu dallaayadda u qaadanaa?*
2. *Sheeg dhcwr waxyaabood oo aynnu  
hadhsanno.*
3. *Maalintii iyo habeenkii midkee ayaa  
aynnu wax hadhsannaa?*

*Naqtiiin "Hadhka".*





*Saca iyo riyaha midkee ayaa uu hac'h-  
koodu muuqdaa?*

*Layli*

1. *Waqtiga iftiinka ah iyo waqtiga mug-  
diga ah midkee ayaa hadhka la arkaa?*
2. *Dhinaca hadhku ku samaysmo iyo qor-  
raxdu isku d'hinac ma noqon karaan?*
3. *Gacantaada hadhkeeda ku sawir war-  
qad ballaadhan.*

*Kul*  
*Ilaha kulka*




*Halkee ayaa aynnu ka helnaa kulka aynnu  
u baahan nahay?*

*Layli*

1. *Magacow laba waxyaabood oo aan  
kulayi ka helno.*
2. *Habeenkii iyo maalintii midkee ayaa  
kulul? Sheeg sababta.*
3. *Haddii aad labadaada gacmood isku  
xoqdid oo aad dhabankaaga saartid  
maxaa aad dareentaa?*

*Ilaha kulka ee dabiiciga-ah*




*Lebadan dhar midkee hor gallala? e?  
Waa maxay sababti?*

*Layli*

1. *Ku buuxi erayadan mid walba meesha ku  
habboon Dabiici, Qorraxda, Kul.*
2. *Qorrada waxa aynnu ka helnaa ——.*
3. *Kulka —— dharka ayaa aynnu ku  
gallajisanaa.*

31.3

*Ilaha kulka ee dadsameega ah*



*Kulka oo dhan ma waxa aynnu ka helnaa qorraxda?*

*Layli*

*Erayadan mid walba meesha ku habboon ku buuxi*

*In la shido, Dadsamee, Kulayl.*


1. *Dabka waxa aynnu ka helnaa* ——

2. *Dabku waxa uu u baahan yahay* ——

3. *Kulaylka dabku waa* ——

31.4

*Waxyaabaha la shito*




*Maxaa degaankiinna laga shitaa si kul loo helo?*

*Layli*

*Khaanadaha bannaan ku buuxi calaamadaha (✓) iyo (X) midba tan ku habboon.*

<i>Walax,</i>	<i>La shito,</i>	<i>Lama shito.</i>
<i>Qoryaha,</i>		
<i>Gaas,</i>		
<i>Caano,</i>		
<i>Koronto,</i>		
<i>Biyo,</i>		
<i>Dhuxul,</i>		

*Kul gudbinta.*



Waixuhu ma isku si ayaa ay kulka u gudbiyaan?

Layli

Erayadan mid walba meesha ku habboon ku buuxi


ayaa ay, uma, kulka

1. Waixuhu waa ay ku kala duwan yihiin gudbinta ——.

2. Biruhu si fiican —— u gudbiyaan kulka.

3. Qoryuhu si fiican —— gudbiyaan kulka.


*"Naqtiiñ" Kulka*



*Kulayl la'aan ma noolaan karnaad?*  
Layli

*Khaanadaha bannaan ku buuxi calaam-adaha (✓) iyo (X) midba tan ku habboon.*

Walax,	<i>Kul</i> ayaa laga helaal	<i>Kul</i> lagama, helo.
Qorrax,		
Dayax,		
Dab,		
Koronto,		
Biyo,		

*Kululaynta biyaha*

*Maxaa ku dhaca hoorka marka dab la saarc?*

*Layli*


*Erayadan mid walba meesha ku habboon  
ku buuxi*

*kululæadaan, karaan, uumi baxaan*

*1. Marka biyaha dab la saaro waa ay ——*

*2. Biyaha marka aad loo kululeeyo waa  
ay ——.*

*3. Biyaha marka kululaynta laga badiyo  
waa ay ——.*

*Gubashada qoryaha.*

*Qoryaha marka la gubo maxaa ku dhaca?  
Layli*

*Erayadan mid walba meesha ku habboon  
ku buuxi*

*dhuxul, dab, qoryo, dambas.*


*1. Qoryaha waxa lagu shidaa ——.*

*2. Gubashadu qoryaha waxa ay u rogtaa  
—— iyo ——.*

*3. Dhuxusha waxa laga helaa —— la  
gubay.*

32.3

Kulka wax ayaan uu jilciyaa



Waxyaabaha kulku jilciyo maxaa ka mid ah?

Layli

Erayadan mid waiba meesha ku habboon  
ku buuxi

kariyaa, jilciyaa, dab


1. Kulku waxyaabaha adag waa uu ——

2. Cuntada waxaa loo —— si ay u  
jilicdo.

3. Birta marka la tumayo waxa lagu jil-  
ciyaa ——.

32.4

Waxtarka kulka.




Immisa siyaabood ayaa aynnu dabka uga  
faa'iideysanna?

Layli

1. Sheeg afar siyaabood oo aynnu dabka  
uga faa'iideysanno.
2. Kulka aan u baahan nahay oo dhan ma  
dabka ayaa aan ka helnaa?
3. Kul la'aan ma noolaan karaa?

32.5

*Isticmaal xumida kulka.*



Kulku wax dhibaato ah ma innoo leeyahay?

Layli

Erayadan mid walba meesha ku habboon ku buuxi

dhibaato, dhimasho, habboona.


1. Dabka haddii si xun loo isticmaalo ——  
— ayaa uu keeni karaa.

2. Dabka in lagu ciyaaraa ma ——.

3. Kulku waxa uu keeni karaa ——.

32.6

*"Naqtiiin" Kulku isbeddel ayaa uu keenaa.*







Waxyaabahan mid kasta sidee ayaa uu kulku u beddelaa?

Layli

Khaanadaha bannaan ku buuxi calaam-adaha (✓) iyo (X) midba tan ku habboon.

Walax,	Dhalaalaa,	Uumibaxaa,	Gubtaa,	Jilcaa.
Biyo,				
Burcad				
Waraaq				
Bir,				

Jabaq  
Aqoonsiga jabaqa.



Jabaqyo kala duwan ayaa aynnu aga-  
gaarkeenna ka maqalnaa. Maxaa  
sameeya jabaqaha?

Layli

1. Sheeg laba noole oo jabaq sameeya.
2. Sawir afar ma-noole oo jabaq laga  
dhaliyo.

Waxtarka jabaqda.




Maxaa ay jabaqdu inoo tartaa?  
Layli

Erayadan mid walba meesha ku habboon  
ku buuxi

dhibaato, hadalka, dhegoolka.

1. Hadal la'aantu waa \_\_\_\_\_.  
2. \_\_\_\_\_ waa aynnu isku afgarannaa.  
3. Qofka \_\_\_\_\_ ah hadal wax looguma  
sheego.

Xubnaha hadalka iyo maqalka ee qofka.



Afka iyo dheguhu maxaa ay innoo taraan?

Layli

Erayadan mid walba meesha ku habboon ku buuxi



hadalnaa, karo, maqalnaa.

1. Afka waa aynnu ku \_\_\_\_.

2. Dhegaha wax ayaa aynnu ku \_\_\_\_.

3. Dhego la'aan waxba lama maqli \_\_\_\_.

Codadka xayawaanka.




Xayawaannadani jabaqda ay sameeyaan ma isku midbaa?

Layli

1. Sheeg saddex xayawaan oo aad maalin walba maqashid codkooda.
2. Immisa jabaqood oo kala duwan ayaa aad samayn kartaa?
3. Sheeg xayawaanka aad codkiisa ugu jeceshahay iyo midka aad codkiisa ugu neceb tahay.

Qalabka muusikada.



Qalabka sare mid walba maxaa loo isticmaalaa?

Layli

Erayadan mid walba meesha ku habboon, ku buuxi

siidhiga, afuufaa, garaacaa.

1. Kamanka waa la ——.

2. —— waa la afuufaa.

3. Turumbada waa la ——.

Naqtiin "Jabaq".



Maalin walba waxa aynu maqalnaa jabaqyo kala duwan.

Maqalka ma ku kala sooci kartaa jabaqahaas?

Layli

1. Magacow shan walxood oo jabaq sameeyya.


2. Jabaqdu waxtar ma u leedahay xaya-waanka? Wax ka sheeg.

3. Sawir saddex walxood oo ka mid ah qalabka muusikada.

34.1 — 34.6

*Naqtiiñ guud*



*Fiiri sawirradan hoose  
Sharax mid walba waxa uu tilmaamayo.*



35.1 — 35.6

*Naqtiiñ guud*

*Fiiri sawirradan hoose.  
Sharax mid walba waxa uu tilmaamayo.*



Qorayaasha Buugga.

1. Cumar Jaamac Maxamed
2. Rashiid Ismaaciil Xuseen
3. Axmed Ibraahim Kooshin (Xiis)
4. Yaasiin Cismaan Dhinbiil
5. Maryan Xaashi Cawaale

Sawirayaasha Buugga.

1. Cabdulqaar Cali Xasan
2. Ibraahim Maxamed Cismaan
3. Maxamed Sh. Cumar Maxamed (Joon)
4. Bashiir Cali Axmed
5. Xaawo Amiin Cali
6. Jim Goodall

Xiriiriyaaha Madbacadda iyo X. H. Manaahijta.

1. Ismaaciil Cali Sarreeye

Waxaa kaloo mahad gaar ahaaneed leh Kooxda Farsamada ee Xafiiska UNESCO u qaabilan taio bixinta waxbarashada Soomaaliyeed iyo habeyayaasha Buggaan daabacaadiisa labaad oo kala ah:

- |                                |        |
|--------------------------------|--------|
| 1. SACIID AXMED XUSEEN (Baafu) | LAYOUT |
| 2. MAXAMED CALI SH. SACIID     | "      |
| 3. CABDULLAAHI MAXAMED GACAL   | "      |

LA TALIYAH:

G. RETAMAL  
UNESCO EDUCATIONAL ADVISER

THIS MATERIAL WAS RE-EDITED AND RE-WRITTEN  
BY THE UNESCO TEAM E.D.C.



United Nations Educational, Scientific  
and Cultural Organization



## MAHADNAQ

*Waxaa mahad leh Hay'adda UNESCO-UNICEF, oo soo abaabushay diyaarinta iyo daabacaada labaad ee Buuggaan, iyo Hay'addaha kale sida:*

**AFRICAN DEVELOPMENT BANK**

**ADRA SOMALIA**

**AMURT**

**CARE (KENYA)**

**CARITAS ITALIANA**

**CISP**

**CONCERN**

**DIAKONIE CARITAS**

**HISAN**

**INTERNATIONAL AID (SWEDEN)**

**IRRES**

**ITALIAN ARMED FORCES**

**KAMAR JASIRA**

**NORWEGIAN CHURCH AID**

**RADDA BARNEN (YEMEN)**

**TROCAIRE**

**UNHCR (HARGEISA)**

**WATER FOR LIFE**

**UNESCO NATIONAL COMMISSION GERMANY**

*iyo*

**WEP**

*oo gacan weyn ka geystay soo saaridda Buuggaan.*

Maarso 1994

